

WARBIXINTA CAALAMIGA AH EE XORIYADDA DIINTA EE

SOOMAALIYA 2014

Warbixin Kooban

Dastuurka ku meel gaarka ah (DKG) waxa uu bixiyaa xaqa ay shakhsiyaadku u leeyihiin in ay ku dhaqmaan diintooda iyago oo aan xadgudbin. DFK waxa uu ka dhigayaa islaamka diinta dalka , waxaa uuna mamnuucayaa faafinta diin kasta oo aan ka aheyn tan Islaamka, isagoo shuruud ka dhigaya in dhamaan shuruucdu ay waafaqsanaato mabaadiida guud ee shareecada. Dawladda dhexe awood uma yeelan in ay ka dhaqan geliso DKG dhulka ka baxsan goobaha ay gacanta ku heyso. Maamul goboleedyada, ay ka mid tahay Jamhuuriyadda iskeed isku magacaawday ee Soomaaliland, Dawladda Puntland, Maamulka ku Meel Gaarka ah ee Jubba (MKJ), iyo Maamulka Ku Meel Gaarka ah ee Koonfur Galbeed (MKKG) qeybaha ay ka maamulaan dalka. Dastuurada Somaliland iyo Puntland waxay ay aqbaleen Islaamku in uu yahay diinta dalka , waxa ayna muslimiinta ka mamnuucayaan in ay diin kale qaataan, kana reebayaan fidinta diin kasta oo aan ahayn tan Islaamka , waxa ayna sharuud ka dhigayaan in dhaamaan shuruucdu ay waafaqsanaadaan mabaadiidada guud ee shariicada. Dastuurka Somaliland waxa uu sidoo kale sharuud ka dhigayaa xoriyda waxyaabaha uu qofku aaminsanyahay. Dastuurka Puntland waxa uu ogol yahay in dadka aan muslimiinta aheyn ay xor uyihiin in ay ku raaxeestaan caqiidadooda, lagumana qasbi karo in ay diin kale qaataan; ma jiraan warbixino sheegaya ku xadgudub ay xaquuqdaas ku xadgudbeen masuuliyiinta dowlada Puntland. MKJ ee dhawaantan la sameeyay iyo dowlad goboleedyada ka sii yar yar ma ay sameyn sharciyo si toos ah uga hadlaya xoriyadda diinta.

Kooxda argagaxisada ah ee Al Shabaab ayaa qashqashaaday, naafeeyay ama dil u geystay dad lagu tuhmay in ay ka baxeen Islaamka iyo kuwo ku guul dareystay in ay hogaansamaa awaamiirta kooxda . Midowga Afrika iyo ciidanka xooga dalka Soomaaliyeed ayaa si guul leh dib uga hirgaliyay awooda dowlada meelo badan oo miyiga ah iyo goobo ay dadku ku badanyihiin ee koofurta iyo bartamaha Soomaaliya oo ay horay gacanta ugu heyeen Al shabaab.

SOMALIA

Waxaa jira cadaadis bulsho oo xoog leh oo ah in la qaato dhaqanda Islaamka Suniga ah. In laga baxo Islaamka lana qaato diin kale waa mid aan bulshadu aqabali karin degaanada oo dhan. Kuwa lagu tuhmay in ay diin kale qaateen waxaa qashqashaad u geystay xubnaha ka tirsan bulshadooda.

Dawladda Mareykanku kuma lahan diblomaasiyiin joogta ah gudaha dalka. Saraakiil ka tirsan dowlada Mareykanka ayaa u safartay Soomaaliya markii xaalada amaanku saamaxday. Dadaalka dowlada Mareykanka ee in la dhiiri galiyo xoriyada diimaha waxa uu diirada saaray dadaalada lagu taageerayo soo celinta deganaanshaha iyo in dib loo soo nooleeyo xukunka sharciga.

Qeybta 1aad. Tirakoobka Diimaha

Dawladda Mareykanku waxa ay ku qiyaastay tirada guud ee dadka 10.4 milyan (qiyaastii Luulyo 2014). Dadka intooda badan waa Muslim Sunni ah. Kooxaha kale oo la isku geeyay waa wax ka yar hal boqolkiiba tirada dadka waxaana ku jira bulsho yar oo masiixiyiin ah iyo kooxo kale oo diimeed , oo ay ku jiraan tiro aan la ogeyn oo Muslimiin Shiico ah. Qaar muhaajiriin ah oo ay ka mid yihiin shaqaale ajnabi ah oo ka yimid Kenya, ayaa ka mid ah kooxaha diimaha kale.

Dowlada dhexe ma heyso xog rasmi ah oo ku saabsan baahsanaanta kooxaha diimeed ee bulshada ka dhex jira.

Qeybta 2aad. Mowqifka Dawladda Dhexe ee Ixtiraamka Xoriyadda Diimaha

Habraaca Sharciga ah

Dastuurka Federaalka ee meel gaarka ah (DFK) waxa uu siinayaa shaqsiyaadka xaqa ah in ay ku dhaqmaan diintooda, laakiin waxa uu mamnuucayaa faafinta diin kasta oo aan aheyn tan Islaamka. Waxa uu dhahayaa in dhamaan muwaadiniintu, iyada oo aan loo eegin diintooda, in ay ku leeyihiin xaquuq iyo waajibaad simman sharciga hortiisa, laakiin waxa uu ka dhigayaa Islaamku in uu yahay diinta dalka, waxaana uu waajib ka dhigayaa in shuruucdu waafaqsanaato mabaadiida shareecada. Lagama dhaafin dadka aan muslimiinta aheyn in lagu dabakho mabaadiida sharciga ee shareecada. DFK si cad uma mamnuucayo in Muslimiintu ay qaataan diimo kale.

SOMALIA

Dastuurada maamul goboleedyada Jamhuuriyadda Somaliland ee iskeed goonida isu taagtay ee waqooyi galbeed, iyo Puntland ee waqooyi bari, waxa ay ka dhigaan Islaamku in uu yahay diinta dalka, muslimiintana waxa ay ka mamnuucayaan in ay diin kale qaataan, waxa ay mamnuucayaan faafinta diin kasta oo aan ka aheyn tan islaamka , waxaa ayna shuruud ka dhigayaan in dhamaan sharuucda la waafajiyo mabaadiida guud ee shareecada.

Dastuurka Somaliland waxa uu ilaaliyaa xoriyadda waxa uu qofku aaminsanyahay. Dastuurka Dawladda Puntland waxa uu mamnuucayaa sharci kasta ama dhaqan kasta oo burinaya Islaamka isaga oo mamnuucaya banaanbaxyada ka soo horjeedo Islaamka. Daastuurka iyo sharuucda kale ee Dawladda Puntland ma qeexayaan waxa ay tahay burinta Islaamka.

Sababtoo ah iyadoo maamulka ku meel gaarka ah ee Juba (MKJ) dhawaantan la sameeyay iyo maamulka ku meel gaarka ah ee Koofur Galbeed (MKKG) iyo maamulada kale ee ku meel gaarka ah ee soo shaac baxaya aysan sameysan dastuuro “gobol”, DFK ayaa ka sii shaqeeya goboladaas.

Xeerka ciqaabta ee la qoray 1963 ayaa weli guud ahaan ka jira gobolada dalka oo dhan. Ma mamnuucayo in islaamka laga baxo oo la galo diin kale, laakiin waxa uu dambi ka dhigayaa aflagaadada iyo sumcad dilada Islaamka , kaasoo keeni kara ciqaab gaaraysa ilaa laba sano oo xabsi ah. Sida laga soo xigtay saraakiisha dowladda dhexe, Puntland, iyo Somaliland ma jirto cid maxkamad lagu soo saaray eedeeymo la xiriira ridoow, aflagaado ama magac dil uu u geystay islaamka.

DFK waxa uu dhigayaa in madaxweynuhu noqdo Muslim, laakiin ka ahan kuwa kale ee xafiisyada haya in ay Muslimiin noqdaan. Dastuurka Puntland waxa uu waajib ka dhigayaa in Madaxweynuhu noqdo Muslim, laakiin kama dhigayo kuwa kale ee xafiisyada haya, in ay Muslimiin noqdaan. Dastuurka Somaliland waxa uu waajib ka dhigayaa in madaxweynaha marka lagu daro, musharaxiinta madaxweyne ku xigeenka iyo wakiilada aqalku ay noqdaan Muslimiin.

Degaanada sida badan garsoorku waxa uu ku tiirsanyahay *xeer* (Dhaqanka iyo caado *xeer* noqotay), shareecada iyo sharciga ciqaabta ee 1963. Habraaca sharcigu waa mid aad u kala duwan waayo bulsho kasta iyada ayaa si gooni ah u xakameysa una fulisa oraahaha diimeed, inta badan isma raacsana.

SOMALIA

Iyadoo aysan la qabin DFK ama dastuurka Puntland, dastuurka Somaliland waxa uu mamnuucayaa sameynta xisbiyo siyaasadeed oo ku saleysan koox diineed gaar ah, fakar diineed, ama tarjumaada madhab diineed.

Wasaarada Arimaha Diinta ee dowladda dhexe ayaa awood sharci u leh in ay diiwaan galiso kooxaha diimeed.

Gudaha Puntland, dugsiyada diinta iyo goobaha lagu cibaadeysto waa in ay ogolaansho ay ku howlgalaan ka helaan wasaaradda cadaaladda iyo arimaha diinta. Gudaha Somaliland, dugsiyada diinta iyo goobaha lagu cibaadeysto waa in ay ogolaansho ay ku howlgalaan ay ka helaan wasaaradda diinta. Sharciga Puntland iyo Somaliland midna ma caddeyn cawaaqibka ka dhalan karta in la howlgaliyo goobahaas ogolaansho la'aan.

Dowladda dhexe iyo maamul goboleedyadu waxa ay waajib ka dhigayaan in Islaamka lagu dhigo dhamaan dugsiyada, kuwa dadweynaha iyo kuwa gaarka ah, marka laga reebo dugsiyada ay leeyihiin dadka aan muslimiinta aheyn. Ma jiro manhaj qoran oo nadaaminaya waxbarashada Islaamka. Ardayda aan muslimiinta aheyn ee dhiganaysa dugsiyada dadweynaha, waxaa laga yaabaa haddii ay codsadaan in laga dhafo waxbarashada Islaamka, laakiin sida ay sheegeen masuuliyiinta dowlada dhexe iyo goboladu, lama helin codsiyo nocaas ah.

Wasaaradda waxbarashada ee dawladda dhexe ayaa loo xilsaaray in in ay nidaamiso waxbarashada diinta dhamaan Soomaaliya. Wasaaraddu ilaa hadda ma ayan sameyn tuse qaran oo waxbarasho. Masuuliyiinta Puntland and Somaliland ayaa nidaamiya waxbarashada diimeed degaanada iyaga hoos taga.

Hab Dhaqanka Xukuumada

Bishii Janaayo Wasiirka ku Xigeenka Wasaaradda Cadaalada iyo Arimaha diinta Fahmo Nuur ayaa baa'bisay xayiraaddii xukuumada ee 24kii Diseembar ee 2013kii ee mamnuucayay in ciida masiixiga looga dabaal dago gudaha Soomaaliya.

Xukuumada dhexe iyo dowlad goboleedyadu waxa ay sii wadeen mamnuuciddii lagu soo rogay faafinta diimaha aan aheyn tan Islaamka, laakiin ma dhaqan geliyaan.

Intii lagu jiray sanadka, wasiirka arrimaha diinta ee dawladda dhexe waxa uu u diiwaan geliyey Golaha Culimada Soomaaliyeed in ay yihiin urur diineed ah.

SOMALIA

Sharci ahaan, dawladda oo kaliya ayaa raadin karta in ay diiwaan geliso ururada diineed ee dugsiyo waxbarasho u furaya xer and waxbarasho diineed. Qaar badan oo ah kooxo diineedyo ayaa doortay in aanay is diiwaan gelin, laakiin dawladdu kama qaadin talaabo ka soo horjeeda iyaga.

Somaliland ma lahayn hab u degsan oo lagu diiwaan geliyo ururada diinta ama shuruudo gaar ah oo lagu diiwaan galiyo kooxaha Islaamiga ah. Si kastaba ha ahaatee, Wasaarada Arrimaha Diinta ee Somaliland ayaa waajib ka dhigtay dhammaan dugsiyada iyo xarumaha diimeed in ay ogolaansho ka heystaan dowladda. Dowladda Soomaliland ma aanay mamnuucin ururada diineed ee aan diiwaan gashaneyn kuma aanay soo rogin ganaax lacageed wax urur diineed ah.

Sidoo kale dowladda Puntland ma lahayn wax sharuuc ah ama nadaam lagu diiwaan galiyo ururada diineed, ma ay mamnuucin ururada diineed ee aan diiwaan gashaneyn kumana ay soo rogin ganaax lacageed ah wax ururo diineed.

Xadgudubyada ay geystaan jabhadaha ama xooggaga ajnabiga ah ama Ururrada Argagixisada.

Iska hor imaad hubaysan oo u dhaxeeya kooxda argagixisada ee Al Shabaab iyo dawladda dhexe iyo isbahaysiyadeeda ayaa sii socday. Al Shabab waxa ay gacanta ku heysaa magaalooyin qaar iyo dhulka baadiyaha ah, laakiin dhamaadkii sanadka waxa ay lumisay gacan ku hayntii magaalada dekada ah ee Baraawe iyo dhowr magaalo iyo tuulooyin ka tirsan gobolada koonfurta iyo gobolada dhexe. Al Shabaab waxa ay si jujuub ah ugu soo rogtay muslimiinta kale fasiraadooda u goonida ah ee shareecada islaamka iyo ku dhaqankeeda.

Sanadka oo dhan, Al Shabab waxa ay qashqashaad u geysatay oo ay xirtay xubno ka tirsan Al-Takfir, urur kale oo ka tirsan salafiyiinta oo fadhigoodu yahay gobolka Gedo, sababo la xariira farqiga u dhexeeya sida kala duwan ee ay u fasiraan Islaamka.

7dii Luulyo niman hubeysan oo aan la garaneyn ayaa ku diley degmada Hawlwadaag ee Muqdisho hogaamiye diineed saameyn lahaa Macalin Cali. Cali waxa uu si joogta ah casharo uga jeedin jiray Raadiyo Muqdisho, isaga oo xoogga saarayay qunyar socodnimada. Khaarijintiisa waxaa guud ahaan lagu xiriiriyay Al Shabaab.

SOMALIA

Maleeshiyada Al Shabaab waxa ay dileen saraakiil dowladda dhexe ka tirsan iyo isbaheysigooda, iyagoo ugu yeeray in aysan aheyn muslimiin ama gaalooben.

21kii Abriil maleeshiyada Al Shabaab waxa ay khaarijiyeen xubin ka tirsan baarlamaanka ku meel gaarka ah Isaaq Maxamed Rino iyagoo waxyaabaha qarxa ugu xiray gaarigiisa . Maalintii xigtay rag hubeysan oo ka tirsanaa Al Shabaab ayaa dilay xildhibaan kale oo ka tirsanaa baarlamaanka Cabdicasiis Isxaaq Mursal. Afhayeenka milateriga ee Al Shabaab Sheekh Cabdicasiis Abuu Muscab ayaa mar dambe siidaayay hadal uu ku sheeganayay in ay Al Shabaab ay dishay labada xildhibaan sababtoo ah dawladda dhexe waxa ay u ogolaatay masiixiyada gudaha Soomaaliya.

Al Shabaab waxa ay dacwad ku soo oogtay dadka masiixiyiinta Soomaalida ah ee laga tirada badan yahay dhulka ay gacanta ku hayaan, oo ay ku jirto dilka kuwo lagu tuhmay in ay qaateen masiixiyada. Waxaa jira warbixino sheegaya in fallaagada Al Shabaab ee ku sugan Baraawe, gobolka Shabeelada Hoose ay bishii Maarso meel fagaare ah ku dileen hooyo dhashay laba caruur ah iyo ina adeerkeed iyada oo caruurteedu ay daawanayeen, iyada oo lagu tuhmay in ay qoysku ay ahaayeen masiixiyiin. Qoysku waxaa la soo sheegay in ay mar dhaw ku soo laabteen Baraawe ka dib markii ay Kenya ku noolaayeen mudo dhowr sano ah.

Gudaha dhulka ay Al Shabaab gacanta ku hayeen waxa ay ka mamnuuceen shineemooyinka, telefishinka , miyuusiga, internetka iyo daawashada dhacdooyinka ciyaaraha. Waxa ay mamnuucday iibka qaadka (marqaan dhaliye caan ah), cabista sigaarka, iyo hab dhaqan kasta oo ay u arkeen mid aan Islaam ahayn sida garka oo la xiirto. Al-Shabaab waxa ay dhaqan galisay shuruuda adage ee ah in haweenku ay xirtaan xijaab dhameystiran.

Maleeshiyada Al Shabaab waxa ay bishii Luulyo ku gubeen dhar midabo leh oo ay lahaayeen dadka tuulo jooga ah oo deganaa tuulooyinka yar yar ee Miir Tuugo, Ceel Baraf iyo Caadley oo ka tirsan gobolka shabeelada dhexe. Kaliya iyaga oo yiri masiixiyiinta ayaa isticmaala dharka midabada leh.

Waxaa jira warbixino dhowr ah oo sheegaya in shaqsiyaad xabsiga loo dhigay ama loo xiray sababo diineed meelaha ay gacanta ku hayaan Al shbaab. Tirada dhabta ahna lama garanayo.

Al Shabaab waxa ay sii waday in ay qashqashaado ururo badan oo bini aadinimo iyo kaalmo oo iclaami iyo kuwo caqiido ku saleysan, iyagoo oo u hanjabay

SOMALIA

nolosha shaqaalhooda kuna eedeynaya in ay raadinayaan in ay Soomaalida galiyaan Masiixiyada.

Cabsi ay ka qabaan aargoosad uga yimaada Alshabaab ayaa sida badan ka hor istaagtay kooxaha diimeed in ay si xor ah u howlgalaan. Waxaa la soo wariyay in Al Shabaab ay xireen masaajidyo ku yaalay meelaha ay gacant ku hayeen. Al shabaab waxa ay u xireen masaajidyada Nuur iyo Al-Huda ee ku yaalay gudaha baardheere, Gobolka Gedo khilaaf soo kala dhexgalay wadaadada degaanka ah oo ku saabsanaa fasiraada Islaamka awgeed.

Al Shabaab waxa ay sii wadeen ololohooda ay ugu tilmaamayaan Howlgakla Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) ee Midawga Africa kuwa masiixiyiin ah oo ay ujeedadoodu tahay in ay qabsadaan oo ay heystaan Soomaaliya.

24kii Febraayo waxaa jiray warbixino sheegaya in Al Shabaab ay ku qasabeen laba la hayste oo Kenyan ah oo ay ka soo afduubteen Kenya iyo Soomaaliya sanadkii 2011 in ay meel fagaare ah uga dhawaaqaan in ay qaateen Islaamka. Waxaa la soo weriyay in labadii la heyste ugu damebyntii la sii daayey. Al Shabaab waxa ay qiil uga dhigteen qabsashadooda in ay ka timid waxa ay ku tilmaameen qabsashada dowlada Kenya ee Soomaaliya.

Al Shabaab waxa ay ku amartay in dugsiyada ku yaal degaanada ay gacanta ku hayso in laga baro qaab mintidnimo ee jihaad kaasoo xoogga saaray in ay tahay in ardaydu qadaan dagaal looga soo horjeedo gaalada, oo ay ku jiraan dalalka gobolku, dowlada dhexe iyo AMISOM.

Qeybta 3aad. Mowqifka Bulshada ee Ixtiraamka Xoriyadda Diinta

Waxaa jira cadaadis bulsho oo adag oo ah in la qaato dhaqamada lala xariiriyo Islaamka Suniga ah.

Bulshada yar ee masiixiyiinta iyo kooxaha kale ee aan islaamka aheyn ma ahan kuwa isa soo bandhiga.

Warbixin bishii Abriil laga soo xigtay warbaahinta gudaha, hogaamiye diineed caan ah oo ku sugnaa Hargeysa, Somaliland, Sheekh Ismaaciil Cabdi uu ku eedeeyey hay'ad samafal caalami oo aan dowli aheyn in ay u dhaqmayso si ka soo horjeeda dastuurka Somaliland iyaga oo faafinaya masiixiyad. Waxa uu bulshada uga digay in ay la shaqeeyaan hay'adaha faafiya caqiidada masiixiga.

SOMALIA

Bishii Agoosto hogaamiye diineed caan ka ah Somaliland ayaa uga digay dawladda Somaliland in ay keenaan hababka ay ku dhqamaan bangiyada reer galbeedka, oo ay ku jirto in dulsaar laga bixiyo xisaabaha keydka ee bangiyada, sida kuwa ka soo horjeeda mabaadi'da aasaasiga ah ee Islaamka. Waxa ayna uga ololeeyeen baarlamaanka iyo dowlada Somaliland in ay ogolaadaan kaliya habka bangiyada Islaamka.

Dadka aan muslimiinta aheyn ee ugu dhaqmay diintooda si furan waxa ay la kulmeen qashqashaad. Ka bixida Islaamka oo looga baxo diin kale waxa ay aheyd mid aan la aqbali karin bulsho ahaan, bulshooyinkuna waxa ay qashqashaadeen kuwa lagu tuhmay in ay ka baxeen diinta.

Ma jirin xarumo guud oo cibaado ee dadka aan Muslimiinta aheyn.

Dugsiyada gaarka ah ayaa ah ilaha waxbarasho ee ugu horeeya. Intooda badan waxaa laga bixiyay daruusta diinta Islaamka. Dugsiyada diinta ee laga soo maaligaliyay dibada oo ku baahsan dalka waxa ay bixiyaan waxbarasho asaasi ah oo jaban, qaar badan oo ka mid ah waxa ay qaateen aydiyoolajiyada Salafiyiinta, gaar ahaan meelaha ay Al Shabaab gacanta ku hayeen.

Qeybta 4aad. Siyaasadda Dawladda Mareykanka

Dawladda Mareykanku safaarad joogto ah kuma laheny gudaha waddanka, Safarada saraakiisha Mareykanku waxa ay ku koobnaayeen meelo la doortay markii ay xaaladaha amaanku saamaxday safarada noocaas ah. Dadaalka dawladda Mareykanka ee in la dhiiri galiyo xoriyadda diintu waxa ay xoogga saartaa in la taageero dadaalada loogu jiro sidii degenaasho loo soo dabaali lahaa loona soo celin lahaa xukunka sharciga.